Maandooriyaha qaadka iyo mushkiladihiisa

Qaybta labaad

Waxaa qoray: Axmed-shiil Muxumed

Borlänge, Sweden

ahmedshil@yahoo.com

”Qaflad aan dareenkeed la qabin, qaadow adigaa leh

Qandaraaska qaatumo xumada, qaadow adigaa leh

Deg deg loo qasaariyo shil qoran, qaadow adigaa leh

Hanti qaran, qanaafiir u gee, qaadow adigaa leh

Qaatala ka Laahuye, adigaa qaranka aafeeyay”

Abwaan Abshir Bacadle, allaha u naxariistee

Bismillaahi wassalaatu wa salaammu calaa rasuulilaahi

Qaybtan labaad ee qoraalkayga Maandooriyaha Qaadka waxaan oga hadli oo qudha arrin kusaabsan tixdaa kor kuqoran oo uu abwaanku kusoo gabogabeeyey maansadiisii 67 bayt ahyd oo uu sida qotoda dheer ugu sharxay dhibaatada ba’an ee uu ugaysto Maandooriyaha Qaadka dadka cuna. Maadaamma aan qoraalkaygii hore si fiican uga hadlay dhibaatooyinka

uu Qaadku qofka shakhsiyan ugaysto, ayaan jeclaystay markanna inaan kahadlo wuxuu ugaystay qaranka soomaaliya iyo waxa uu wali kuhayo labadaba.

Ciidamadii qalabka Siday, Siyaasiyiinta iyo wadayaasha gaadiidka

Ciidamada qalabka Sida:

Waxaa macruuf ah in dalalka dunida saddexaad ay inta badan ciidamada qalabka sida yihiin lafdhabarta dalka, oo hadday xummaadaanna uu dalku qalalaase joogto ah kujiro, hadday hagaagaanna uu dalku xasilo oo uu hagaago, oo waxaa tusaale kuugu filan Kacdoonnadii kabillowday dalalka Carabta oo dalba dalkuu ka ciidan fiicnaa oo uu ciidankiisu ka nidaam iyo akhlaaq wanaagsanaa, uu u baxsaday kuna badbaaday. Meesha Masar iyo Tuuniisiya uu shacabkoodu kahelay taageero iyo xoojin markuu aad ugu baahnaa Ciidamadooda Qalabka sida, siiba kuwa millatariga oo ay ubaxsadeen, dalalka Yaman, Suuriya iyo Liibiya bilcaksi, waxaa soo baxday inayna lahayn ciidan dhisan oo leh nidaam iyo asluub lugu garto una haga waajibaadka uu dalka iyo dadka uhayo.

Khaladka ugu wayn ee uu ciidan millatari ah sammeeyo ayaa ah inuu dib ugu jeedsado qorigana ku foorariyo shacabkiisa loo abuurayba inuu difaaco shisheeyahana ka ilaaliyo. Halka marka labadaa dal ee hore een xusay uu ciidanku fahmay waajibaadkiisa diidayna in loo adeegsado cabudhinta dadka, saddexda dal ee kale ceebta ciidamdooda ayaa soo baxday, oo waxaa caddaatay inayna ahayn ciidan qaran ee ay ahaayeen malleeshiyaad calooshood ushaqaystayaal ah oo hadba meesha afka loo saaro xabbadda uriddo. Ciidamadii Qalabka siday ee soomaaliya qofkii kamid noqdaybaa garanee ma fiicnayn tababarkooda oo qudha waxaa labari jirey sida loo dagaallammo loona isticmaalo hubka noocyadiisa kala duwan. Haddaan ciidanka aqoontiisa laballaadhin oon dhinacyo badan laga kobcin waxay ubadan tahay inuu lakulmo xaalado ay ku adkaato inuu ka dabbaasho sidaana uu kuqaato go’aan khalada oo dhibaato ba’an sababi kara.

Intaa kasokoow ciidamadii qalabka siday ee soomaaliya ceeb kasto oo ay lahaayeenba oo laga yaabo inay lawadaageen inta badan ciidamada Afrika kadhisan, waxaa u udheeraa maandooriyaha Qaadka oo ay ciidamadu si ba’an ugu xidhnaayeen uuna ahaa quut ay joogtaysteen. Waxaa ladhihi karaa ciidamada qalabka sida marka laga reebo wadayaasha gawaadhida waxay ahaayeen kooxda labaad ee ugu badnayd isticmaalka maandooriyahan sunta ah. Taas oo meesha kasaarayso tayo iyo karti laga sugo, kana dhigaysayba halis dhuunta ugu jirtay bulshada soomaaliyeed. Dhaqankaa isaga ah ee isticmaalka maandooriyaha qaadka wali waa sidiisii oo xitaa mallayshiyaadka qabaliga ah ee hubaysan ee xasuuqa iyo mashaqada kawada koonfurta soomaaliya siday ciidamada qalabka sida ugu xidhnaayeen maandooriyahan si kadaran ayey ayaguna ugu xidhan yihiin. Taasna waxay

meesha ka saaraysaa wanaag laga sugo dhinacooda, maxaa yeelay qof caafimaad qaba oo akhlaaq wanaagsan leh unbaa awoodo inuu la yimmaado dhaqan suuban. Qof maandooriye maciin biday oon miyir lahayn wax wanaag ah oo laga sugi karo majirto.

Siyaasiyiinta:

Siyaasiyiintu waxay ahaayeen walina aan ubadin hayaa inay yihiin qaybaha bulshada soomaaliyeed kuwa ugu isticmaalidda badan maandooriyaha qaadka marka lagasoo tago wadayaasha gawaadhida iyo ciidamadii qalabka siday. Siyaasi waxaa ladhihi karaa waa maskaxda dal iyo dadba, maxaa yeelay waa ayaga kuwa laga rabo inay dalka iyo dadkaba hagaan, keenaanna siyaasad hufan oo wax lugu hoggaamiyo, haddii marka siyaasigu yahay mid kuxidhan maandooriye, ama qaad ha noqdo ama maandooriye kalee waxaa halkaas kasoo baxayso inuusan jirin masuul loogu yeedho siyaasi, oo qudha waa shakhsi aan waxkale iskadhaafee naftiisaba ka adkayn meelna aanan gayn karin, una baahan shakhsiyan daryeel iyo latacaal. Waxaa marag madoonto ah inuu siyaasiga soomaaligu qaalibiyan gafay waajibaadkiisii siyaasi ahaan. Taasoo kadhigtay soomaaliya darajada siyaasi maanta wax laga xishoodo maadaamma musuqmaasuq, qabyaalad iyo dhaqammo xunxun lagu saleeyey, Arrintaana waxaa ugu wacan waxyaabo badan oy kamid tahay;

1- fahamka siyaasad waxa ladhaho oo billowgii horeba qalloocday lalana aaday dhinac khalad ah, marka guud ahaan soomaali laga hadlayo, siyaasigana jaho wareerkaas bulsho ayuu dhinaciisa uga jiraa oo asagoon haba yaraatee fahamsanayn siyaasadi waxay tahay iyo qaabkii siyaasigu ushaqayn lahaa ama udhaqmi lahaa asagoo adeegsani siyaasad nadiif ah oo hufan ayuu iska xoogsanayaa wixii la qunnaadana isaga kacaa. Arrintaa iyada ah waxay keentay inay siyaasaddu soomaaliya kanoqotay xirfadda ugu liidato ee wax lugu raadsado ayna isku ursursadaan inta badan dad aan mabaadii' haga lahayn oo aad u jahowareersan inta badanna shisheeyuhu ku adeegto.

2- bulshada soomaaliyeed oon inta badan aan kalabaran kala soocidda waxa loo yaqaanno Danta Guud iyo Midda Gaarka ah. Arrintaas waa dhaqan qaalib noqday oo qofku inta badan dadaalkiisa uu ku koobo baahidiisa, asagoo dayaca danta guud iyo baahida bulshada. Qofka siyaasiga ah ee kasoo dhaxbaxana waddadaa unbuu hayaa oo wuu ogyahay inaan lala xisaabtamayn siyaasadda soomaaliyana ayna lahayn wanaag iyo xummaan, sax iyo khalad midna ee ay tahay qofba siduu uturjumto.

3- Isticmaalka maandooriyaha Qaadka oo ah hawl qofka kareebto qayrkiis, siyaasigu asagoon kolkiisii horeba lahayn hadaf sare, wax wanaag ahna aan laga sugayn oo uu

ku koobnaa baahidiisa shakhsi iyo siduu kuhelo oo qudha wuxuu asaga ubaahanyahay ayuu kudaray cunidda maandooriye wax curyaamiyo, taasoo kadhigtay murtidii ahayd ” kadar oo dibi dhal”. Qofkii daliil raba waxaa kufilan inuu arko 550 qof ee loogu yeedhay Xildhibaanno ee maanta joogo Muqdisho. Waxaa lasoo wariyey in marka codkooda loo baahdo oo ay is hayaan saddexda nin ee ugu sarreeyso kooxdaa is ururSatay lakala iibsado codkooda oy sidaa ugu codeeyaan arrinta miiska lasoo saaro. Intaa waxaa sii dheer haddayna saddexdaa nin ee sare is qabsan mana shiraan hadalkoodana lama maqlo, maxaa yeelay waxay ubadantahay laba mid; inay qayilaad kumashquulsan yihiin oy sakhraammad dhax jiifaan ama inay maqaaxiyaha fadhiyaan oo maxaa layidhi leeyihiin. Waxaa la dareemmaa inay jiraan oo qudha, marka ay raggaa kore isqallacaan, markaa ayey hurdada kasoo kacaan iyagoo laaluush doon ah. Kawarran marka dadka noocaas ah dalka ama dadka ay masuul uyihiin lagana sugayo inay hagaajiyaan mustaqbalkooda?

Wadayaasha Gaadiidka:

Wadayaasha gaaiidku waa qoomka ugu cunidda badan bulshada soomaaliyeed maandooriyaha Qaadka, aniga shakhsiyan lama kulmin noloshayda intaan soomaaliya joogay darawal aan cunin qaadka. Marka lawaraysto sababta ku kalliftay inay cunaan mandooriyaha waxay kujawaabi jireen inta badan; wuxuu dilaa daalka iyo hurdada. Waa wax la og yahay in daalka dawadiisu tahay nasiino la nasto, sidoo kale hurdo inay wax dabiici tahay oon xal kale iyo dawo kale aan loo lahayn oo qudha loo baahanyahy in laseexdo. Hadday marka dhacdo in khayaano lasammeeyo oo la isticmaalo maandooriye waxaa halkaa ka imani inta badan dhibaato kawayn tii laga cararahayey.

Shilalka gawaadhida inta badan waxaa sababi jirey shakhsi sakhraansan oo Qaad kadhargay, kadib markuu kala garanwaayo xaqiiq iyo dhalanteed (Hallucination). Waxay ahayd wax caadi ah markay wadayaasha shil baabuur galaan hadday kabadbaadaan marka lawaraysto oo layidhahdo maxaa dhacay oo shilka keenay inay dhahaan waxaan aragnay dad dhar cadcad qaba oo jidka dhaxtaagan kadibna ka leexo ayaan idhi oo saasuu shilka kuyimid. Qisada noocas ah aadbay usoo noqnoqon jirtay iyadoo isku mid ah waxaana halkaas ka cad inay duulku isku cudur qabeen, cudurkooduna ahaa (hallucination) uu maandooriyaha Qaadka sababay.

Waxaa wax aad loo qariibsada ah in ummad dhan oo 10 milyan kabadan ay fahmi waydo halista uu maandooriyahaas kuhayo iyo burburka uu sababay labadaba. Wadaha asagoo uu afka uga buuxo Qaadka ayuu rakaabka gaadhiga saaran, waana naadir qof dhihi kuraaci maayo ninkaadan waalan ee madaxa looga jiro.

Ugu danbayntii

Dagaalka jiritaanka soomaali lugu hayo wuu badan yahay, laakiin waxaa ugu halis badan dagaalka maandooriyaha Qaadka oo ay Kenya iyo Itoobiya kuhayaan Soomaaliya iyo Soomaali oo dhan. Bil walba waxay qaataan malaayiin dollar kadibna kusoo badalaan kumannaan kun oo tan oo sun ah, suntaasoo aan ku ekaanayn qofka cuno oo qudha ee saaqayso bulshadoo dhan iyadoo usaaqi dhinac walba, dhibaatooyin ba'anna ugaysanayso bulshada ama xag caafimaaq ha noqoto ama xag qoys ama xag dhaqaale ama xag nabadgalyo iyo waliba mustqabal ahaan maxaa yeelay jiilal dhan oo aad ufara badan ayaa baaba'ayo. Waxaa la barbar dhigi karaa musiibadaas qaadku, dagaalkii mukhadaraadka ee dhaxmaray Shiinaha iyo Ingiriiska ee loo yaqaannay The opium wars ee kala dhacay 1839-1842 iyo 1856-1860 kii.

Waa muhiim inay dadka indheergaradka ah ayagoo la kaashanayo hay'adaha caalamka ee ladiriro maandooriyayaasha inay tallaabo ka qaadaan suntaas cagaaran ee umadda xididdo siibka kuhayso, maadaamma ayna nidaamyo ama dawlado soomaaliyeed oo wax kaqaban karo arrintaa amaba fahmi karaba baaxadda dhibaatadaas halista ku ah jiritaankeenna ayna jirin muddooyinkanna aan lasugayn. Culimada islaamka waa inay kadhigtaan ladagaallanka maandooriyahan hadafkooda koowaad, maxaa yeelay haddaan bahalkaa meel lasaarin oon loo arag sun halisa oo ka soo dajiya aan lala dagaallamin, oo ka sii gada aan tallaabo laga qaadin, oon ka cuna aan la ehbin lana dawayn wallee jinsiga soomaaligu meel fool xun iyo haadaan dheer buu kusocdaa, waa hadduusanba hore kudhicine.

Qore:

Axmed-shil Muxumed

ahmedshil@yahoo.com

Borlänge, Sweden